

Deeqda 2007da ee Daryeelka Hoyga



Cudurka neefta waxaa kiciya ama sii xumeeya waxyaabo inta badan guryaha laga helo sida bustaha, qoyaanka ku dhasha darbiga guryaha, xaywaanka dad la jooga ah, baranbarada, iyo sigaarka lagu cabo.

Si aad uga hortagto ama u yareyso waxyaabaha neefta kiciya waxaa jira waxyaabo ay HUD ugu talo gashay inay ugu deeqdo qoysaska iyada lacag la'aan ah .

Waxyaabaha ka hortagga ah ee aad deeqdan ku halaysaan waxaa ka mid ah:

- Hawo nadiifiye
- Dhul xaaqe (vacuum) si gaar ah loogu talagalay
- Gogosha sariirta iyo foodaraha barkinta
- Hawo qalajiye
- Waxyaabo ka hortaga kaarboon manooxideka
- Dab damiye
- Hawo nadiifiye lagu xoojiyay kululeeye
- Nidaam lagu xakameeyo cayayaanka
- Ka hortaga waxyaabaha ka dhasha hawada qoyan iyo darbiyada qoyan.
- Qiic sheege
- Ma haysataa ilmo neef qaba
- Ma degan tahay degmada Hennepin ama Ramsey

Haddii aad danaynayso inaad hesho deeqdan, fadlan soo wac 651-642-1825. Waanu ku faraxsanaan lahayn inaanu ku wargelino sida aad deeqdan adiga iyo ubadkaagaba uga faa'iideysan kartaan

Deeqda HUD ee daryeelka caafimaadka waxaa marti galiyay Hay'adda degaanka iyo caafimaadka caruurta. Ujeedda deeqdan waa in la yareeyo waxyaabaha neefta kiciya si kor loogu qaado tayada caafimaadka ee ubadka neefta qaba. Waxaa kaloo ay daraasaddani dhaqan galinaysaa hab qiimo jaban ah oo wax looga qabanayo waxyaabaha xasaasiyadda keena, rinjiga duqooba, qoyaanka darbiga guryahah ku dhasha iyo waxyaabaha kale ee degaanka guryaha laga qaado.

